# Tilmaanta Waalidka ee Rafcaanka

**Nidaamka Rafcaanka**

Qoysaska ardayda, ee loo arkay in aanay u qalmin adeegyada ee aanan ku raacsaneyn qiimeynta dhibcaha ee la sameeyay, waxay rafcaan ka qaadan karaan go'aanka la gaaray xaaladaha qaarkood. Fadlan si tartiiba u akhri mana bixino rafcaan si rafcaan loo qaato.

**Nidaamka Rafcaanka ee Socodka Imtixaanka**

Haddii ilmahaagu ka qayb qaato imtixaanka u qalmidda, waxaad natiijada heli doontaa dabayaaqada jiilaalka ama horraanta gu'ga kaasi oo ah warbixinta go'aanka Guddiga Kooxda TAG. waxaad xaq u leedahay in rafcaan ka qaadato go'aanka guddigu gaartay. Warqadaha rafcaanka oo buuxa wuxuu ku beegan yahay muddo saddex toddobaadka laga bilaabo taariikhda ogaysiinta la helo. Sidoo kale fadlan ogow haddii ilmahaaga loo arkay in aanu u qalmin, waxaad isaga/iyada u tilmaami kartaa in sanadka soo socda dib imtixaan looga qaado.

Haddii aad doorato in aad rafcaan qaadato, waxaa suuragal ah in rafcaanku bixiyo macluumaad dheeraad ah, sida warqaddo taageero ah ama talooyin tilmaamaya guulaha uu ardaygu ka gaaray fasalka ama caddayn dheeraad ah laga yaabo in ay ku taliso baahida loo qabo in dib imtixaan looga qaado ama la sameeyo dib u qiimeyn la xiriirta go'aanka qiimeynta. Warqadaha rafcaanku waa in ay kaliya noqdaan kuwo ka hadlaya meelahan aan buuxinayn shuruudaha u qalmidda. Rafcaanka waa in ay la socotaa warbixin saxiixan oo uu leeyahay waalidka/mas'uulka taasi oo sharaxaad ka bixinaysa sababta rafcaanka loo qaatay. Tani waxaa la soo raaciyaa foomka rafcaanka "Appeals Form."

**Maxaad soo raacin kartaa?**

- Qiimeynta dheeraadka ah
- Talooyinka macalinka oo qoraal ah
- Guusha la gaaray hadu waxay ugu yaraan hal heer oo fasalka ah ka sarraysaa heerka fasalka hada la dhigto
- Caddayn la xiriirta shaqada fasalka oo muujinaysa guul gaar ah oo tayo leh oo la gaaray.
- Baahida luqadeed iyo dhaqan ee ilmaha. Tusaale, ilmaha oo laga yaabo in uu luqaddo badan ku hadlo

**Jadwalka:**
Warqadaha rafcaanka oo buuxa wuxuu ku beegan yahay muddo saddex toddobaadka laga bilaabo taariikhda ogaysiinta/warqada waalidka le helo. Waxa ay noqon doontaa mas'uuliyada waalidka iyo/ama dugsiga in ay u hoggaansamaan haddii ay jirto dib u qiimeyni. Ma awoodi doono in aan dib qabano kulanada laga maqnaaday. Goobta iyo wakhtiga waa la go'aamin doonaa.

**Halkeed u diraysaa foomamka rafcaanka iyo warqadaha?**
Fadlan waxaad foomka rafcaanka "Appeals Form." Iyo warqadaha u dhigma u dirtaa:

The Department of Talented and Gifted Education
PPS Blanchard Education Service Center
501 N.  Dixon St.
Portland, OR 97227
Telefoonka: 503-916-3358